

Yaraynta Tartiib-tartiibka ee Xaddidaadaha COVID-19

Xigasho: dowlada Malta

Abriil 2021

Sida ay ku dhawaaqday Dowladda Malta 7da Abriil 2021, xayiraadaha hadda jira ee ka hortagga COVID-19 waxaa loo dabcin doonaa sida soo socota:

FURITAANKA DUGSIYADA: 12 Abriil ilaa 16 Abriil

- **Isniinta 12 Abriil:** Xarumaha daryeelka carruurta, xarumaha xanaanada iyo dugsiyada hoose ayaa dib loo furi doonaa
- **Arbaco 14 Abriil:** Dugsiyada Dhexe (Foom 1 iyo Foom 2) ayaa dib loo furi doonaa
- **Jimcaha 16 Abriil:** Dugsiyada sare (Foom 3 ilaa Foom 5) ayaa dib loo furi doonaa
- Dhammaan dugsiyada sare ee dambe (foom lixaad, jaamacadda, MCAST) waxay ku sii jirayaan qaabka onlineka

NIDAAMYADA CAAFIMAADKA IYO GURYAHA WAAYEELKA: 12 Abriil

- Qalliinnada la xushay waxay dib ugu bilaabanayaan cusbitaalada
- Dadka waayeelka ah booqashooyinka guryaha ayaa dib loo bilaabi doonaa

MASASUULADAH KANIISADA: 18 Abriil

- Masasuuladaha kaniisadaha ayaa dib u bilaabmi doona, iyadoo la qaadayo tallaabooyin yareyn ah

DUKAAMAHA IYO ADEEGYADA AAN MUHIIMKA AH: 26 Abriil

- Dukaamada aan muhiimka ahayn (tusaale, dukaamada dharka) ayaa dib loogu furi doonaa hab maamuus yareyn ah
- Adeegyada aan muhiimka ahayn (tusaale, timajarayaasha) ayaa dib loogu bilaabi doonaa hab maamuus yareyn ah

ISU-IMAATINADA: 26 Abriil

- **Ilaa 26 Abriil, kaliya laba qof ayaa loo oggol yahay inay isugu soo baxaan meel fagaare ah,** haddii aysan dadka isku-imaanaya kawada tirsanayn hal reer. 26-ka Abriil, xadka isu imaatinnada bulshada dhexdeeda ah wuxuu ukordhi doonaa ilaa 4 qof. **Waxaa jira ganaax gaaraya ilaa € 300 oo jabinta sharcigan ah.**
- **Ilaa 26 Abriil, kaliya laba qoys ayaa loo oggol yahay inay ku soo ururaan gudaha guri gaar loo leeyahay.** 26-ka Abriil, xadka isu imaatinnada qoysaska ayaa ukordhi doona 4 qoys. Saraakiisha fulinta (sida booliska) ayaa laga yaabaa inay galaan guryaha gaarka loo leeyahay si loo baaro in dadku raacayaan sharciyada. **Waxaa jira ganaax gaaraya ilaa € 300 oo jabinta sharcigan ah.**

UNHCR Malta ma aha isha rasmiga ee macluumaad kan. UNHCR Malta ayaa torjuntay macluumaad kan. Si ay kaga dhigto inad ku heli karto luqada aad fahmayso. Iyo si aad ula wadaagto qaxoontiga iyo magangalyo doonka ee Malta.

MAASKARO

- Xirashada waji xirka weli waa ku qasab gudaha iyo dibedda bannaan ee goobaha dadweynaha, iyadoo dabooleysa sanko iyo afka labadaba. Waxaa jira ganaax ah € 100 haddii aadan xirneyn maaskaro. Kaliya waxaa lagu oggol yahay inaad iska bixiso maaskaradaada si aad wax u cunto ama aad sigaar u cabto, ***adigoo fadhiya***.
- Ganaaxyada waxaa lagu qaadi doonaa dadka dibedda ku lugeynaya iyagoo aan maaskarada wadan. **Cunid, cabid ama sigaar dhuuqid adigoo soconaya ama taagan maaskaro la'aan, ganaax ayaa ka dhalan doona.**

Wixii macluumaad dheeraad ah iyo cusbooneysiinta booqo www.health.gov.mt